## Xuquuqdaada iyo In Lagaa Ilaaliyo Kharashkaaga Caafimaadka Lama Filaanka

Marka aad qaadato daryeelka xaalada degdega ah ama uu ku daweeyo daryeel bixiyaha ka baxsan dalada oo ku sugan xarun caafimaadka oo dalada ku jirta ama xarunta qaliinka wareega, waxaa lagaa ilaalin doonaa kharashka dalicida lama filaanka ah ama kharash dalicida baaqiga.

## Waa maxay "kharash dalicida baaqiga" (mararka qaar loo yaqaan "kharash dalicida lama filaanka ah")?

Marka aad la kulanto dhakhtar ama daryeelka caafimaad bixiye, waxa lagugu yeelan karaan kharash jeebada aad ka bixiso, sida wada bixinta, caymis wadareed, iyo/ama kharash lagaa jaro. Waxa aad yeelan kartaa kharashaad kale ama waxay noqonaysaa inaad wada bixiso kharashka oo dhan hadii aad la kulanto bixiye ama aad booqato xarunta daryeelka caafimaadka aan ku jirin daladaada caymiska caafimaadka.

"Ka baxsan dalada" waxa lagu sheegaa bixiyayaasha iyo xarumaha aan heshiis kula jirin caymiskaaga caafimaadka. Bixiyayaasha ka baxsan dalada waxaa loo ogolaan karaan inay kugu soo dalacaan kharashka inta ka hadhay inta uu ogolaado inuu bixiyo caymiskaagu iyo kharashka dhamaystiran ee adeega. Waxaa loo yaqaan "**kusoo dalicida baaqiga**." Lacagtan waxay u badan tahay inay ka badato kahrashka dalada ee isla adeega oo loomana tiriyo xadiga sanadkii jeebka aad ka bixinayso.

"Kharash dalicida lama filaanka ah" waxaa weeye kharash dalicida aanad filanaynin. Waxa ay dhacaan marka aanad xakamayn karin cida daryeelkaaga ka shaqaynaysa-sida marka ay jirto xaalada degdega ahí ama marka aad booqanayso xarun ku jirta dalada laakiin adiga oo aanad filanaynin ay ku daweeyaan bixiye ka baxsan dalada.

### Waxaa lagaa ilaaliyaa kharashka baaqiga ee:

**Adeegyada xaalada degdega ah**

Hadii aad qabto xaalada caafimaad oo degdeg ah oo aad qaadato adeegyada xaalada degdega ah oo aad ka qaadato bixiye ka baxsan dalada ama xarun, badanaa bixiyahaagu ama xarumuhu kharashka ay kugu dalacayaan waxaa weeye xadiga kharashka aad la wadaagto kuwa dalada ku jira caymiskaaga (sida wada bixin iyo caymis wadareedka). Ma **awoodid** inaad baaqiga geliso adeegyadan xaalada degdega ah. Waxaa kamid ah adeegyada ay dhici karto inaad qaadatay kadib marka xaaladaada la dejiyo, adiga oo ogolaanshe qoraal ah bixiya oo ka tanaasula badbaadadaada in aan baaqiga lagugu soo dalicin moojee wixii adeegyadan marka xaaladaada la xasiliyo.

Hadii aad qabto "CO_DOI" oo kuugu jirta kaadhkaaga aqoonsiga caymiskaaga caafimaadka oo aad qaadanayso daryeelka iyo adeegyada lagu bixiyo xarunta caafimaad ee caadiga ah ama hay'ad ku taal Colorado waxaa kaliya lagugu dalici karaa xadiga kharashka la wadaago ee ku jira dalada caymiskaaga, oo ah waxa la wada bixiyo, inta lagaa jaro iyo/ama caymis wadareedka. Laguguma dalici karo waxkale. Tani waxay khusaysaa kaliya adeegyada la xidhiidha oo waxaana loo dalici karaa "adeega xaalada degdega ahaan".

**Adeegyada qaar xarumaha caafimaadka dalada ku jira ama xarunta qaliinka wareega.**

Marka aad ka hesho adeegyada xarun caafimaad oo dalada ku jirta ama xarunta qaliinka wareega, bixiyayaasha qaar waxay noqon karaa kuwo dalada ka baxsan. Mararkan oo kale, badanaa bixiyayaasha waxay kugu dalici karaan kharashka ah xadiga kharashka la wadaago ee ka ku jira dalada caymiskaaga. Waxay tani khusaysaa dawada xaalada degdeg ah, suuxdinta, xanuunada faafa, shucaaca, shaybaadhka,

iyo qaliinka la kaalmeeyay. Bixiyayaashan **kuma** dalici karaan baaqiga oo **ma** dalban kartid in lagaa ilaaliyo baaqiga lagugu soo dalici karo.

Hadii aad ka hesho kaalmo xarunku jirta dalada, bixiyayaasha ka baxsan dalada **kugumasoo** dalici karaan baaqiga, iyada oo ogolaanshe qoran lagaa hayo moojee oo aad kaga tanaasulayso badbaadaada.

**Marka waajib kuguma aha inaad ka tanaasusho badbaadaada baaqiga lagugu dalacayo. Kugu waajib maaha inaad ka qaadato daryeelka bixiye ka baxsan dalada. Waxa aad dooran kartaa bixiya ama xarun ku jira dalada bixiyaha.**

Hadii kuu kuugu yaalo “CO_DOI” kaadhkaaga aqoonsiga caymiska caafimaad oo aad daryeel ka qaadato iyo adeegyada xarunta ama hay'ada caafimaadka ee ku taal Colorado:

**Adeegyada Aan Xaalada Degdega ahayn ee Xarunta Ku Jira ama Ka Baxsan Dalada**
Shaqaalaha xarunta ama hay'adu waa inay kuu sheegaan hadii aad ku sugan tahay goob ka baxsan dalada ama hadii ay u imanayaan bixiyayaal ka baxsan dalada marka la garanayo. Shaqaaluhu waa inay kuu sheegaan noocyada adeegyada aad isticmaalayso ee uu bixinayo bixiye ka baxsan daladu.

Waxa aad xaq u yeelan kartaa inaad dalbato bixiye ku jira dalada inuu kuu qabto dhamaan adeegyada caafimaadka caymisku bixinayo. Laakiin, waxaa khasab kugu noqon karta inaad ka hesho adeegyada caafumaadka bixiye ka baxsan dalada hadii bixiyaha ku jira daladu aanu jirin. Hadii caymiskaagu uu bixinayo adeega, waxa kaliya lagugu dalacayaa xadiga kharashka la wadaago ee bixiyaha ku jira dalada, taas oo ah wada bixinta, waxa lagaa jaro, iyo/ama caymis wadareedka.

**Nidaamyo Dheeraad ah**

- Caymiskaagu waxa uu u siin doonaa kharashka bixiyayaasha ka baxsan dalada iyo xarumaha si toos ah.
- Bixiyayaha ama xarunta ama hay'adu waa inay gudaa wixii kharash ah ee dheeraad ah ee la siiyay mudo 60 maalmood gudahood ah marka loo sheego.

## Marka aan la ogolayn dalicida baaqiga, waa inaad raacdaa waxyaabaha soo socda ee kaa ilaalinaya:

- Waxa kaliya adigu ka masuul tahay bixinta kharashkaaga (sida caymis wadareed, wada bixin, iyo waxa lagaa jarayo ee aad bixin lahayd hadii uu yahay bixiye ama xarun ku jirta dalada). Caymiskaaga caafimaadku waxa uu u siin doonaa kharashka bixiyayaasha ka baxsan dalada iyo xarumaha si toos ah.
- Caymiskaaga caafimaad guud ahaan waa inuu:
    - Bixiyaa kharashka adeegyada xaalada degdega ah iyada oo marka hore aanu sii dalban ansixin adeegyada oo hore (ogolaanshe hore).
    - Adeegyada xaalada degdega ah ee caymisku bixiye ee ay bixiyaan bixiyayaasha dalada ka baxsan.
    - Ku salee waxa uu kugu leedahay bixiyaha ama xarunta (kharashka la wadaago) waxa aad siin lahayn bixiyaha ama xarunta ku jira dalada oo tus in xadiga ku jira sharaxa gunooyinka.
    - Ku tiri wixii xadi ah ee aad ku bixinayso adeegyada xaalada degdega ah ama adeegyada bixiyaha dalada ka baxsan wixii lagaa jarayo ama xadiga jeebkaaga aad ka bixinayso ee ugu badan.

# Foomka Macluumaadka Kharash Dalicida Lama Filaanka ah/Baaqiga

Hadii aad u aragto in si khaldan laguugu soo dalacay kharashka, waxa aad kala xidhiidhi kartaa 800-985-3059 wixii ku saabsan shuruucda federalka, ama Waaxda Colorado ee Caymiska 303-894-7499 ama 800-930-3745 shuruucda Colorado, ama waaxda kharashka dalcaya ee

Booqo cms.gov/nosurprises/consumers wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xuquuqdaada sharciga federalka.

Saxeexaygu waxa uu qirayaa in aan heley wargelintan oo kama tanaasulayo wax xuquuqdayda ah oo uu isiinayo sharcigu.

Magaca bukaanka (daalacan) | Xidhiidhka bukaanka

Saxeexa bukaanka ama wakiilka sharci ee loo ogol yahay | Taariikhda | Saacada

**Turjubaad:** Kulamada la turjubay ee waakulka/wakiilada ee (magaca ama lambarka) hadii ay ku munaasab tahay________________________